
# Qoraalka Hanuuninta-TCM ee loo yaqaan 'Desk-Side WorkFirst' 1.3

1.4.2 Sidee loo sameeya hanuuninta WorkFirst?

Hanuuninta waa in lagu fuliyaa miiska-dhinaciisa iyadoo la siinayo baakat-ka hanuuninta sidoo kale iyadoo la shidayo fiidiyoowga hanuuninta ama akhrinta qoraalka si loo xoojiyo tarjumaadda loogu talagalay waalidiinta aqoontooda Ingiriisiga xaddidan tahay (LEP). Hanuuninta:

- Waa ineey noqotaa hanuunin uu qofka xaadir yahay, marka laga reebo hadii macmiilka
  - Lashaqaaleeyay;
  - Leeyahay xaalado caafimaad oo daran; ama
  - Imaan karin xafiiska sababa la xiriira arrimaha rabshadaha qoyska kajira awgeed
- Haddii macmiilku buuxiyo shuruuda loogusameeynayo hanuuninta taleefonka, ku qor sababta bogga Diiwaangelinta Shaqada ee qofka weyn looga hadlayo oo kujira Aces Online.

| FIIDIYOOW MUQAAL | Qoraal |
|---|---|
| 01<br><br> | Kusoo dhawaaw WorkFirst ohanuuninteeda. Inta lagu jiro daqiiqadaha yar ee soo socda, waxaan wadaagi doonnaa macluumaadka ku saabsan Kaalmada Ku-meelgaarka ah ee loogu talagalay Qoysaska Baahan (ama TANF) iyo barnaamijyada WorkFirst.<br><br>TANF waa barnaamij deeq lacageed ah iyo WorkFirst waa barnaamij ku siinaya xulashooyinka howlaha kugu caawin kara inaad shaqo hesho ama sameyso waxyaabo kale oo kugu caawinaya inaad gaarto hadafyada reerkaaga.<br><br>Haddii aadan hore u helin, waxaad heli doontaa baakat ay ku jiraan waraaqo-yaryar iyo maclumaadka agabyada kucaawin karo ee laga helo degaankaaga.<br><br>Waxaan kaa codsaneeynaa inaad qorto wixii qoraal ama su'aalo ah ee aad qabtid, si aan ugawada doodna kadib markaa fiidiyoowga daawatiin. |
| 02<br> | Gobolka Washington, dadka waaweyn waxay heli karaan wadarta 60 bilood oo TANF ah inta ay nool yihiin.<br><br>Tan waxaa ku jiri kara kaalmo lacageed oo aad ka heshay gobol kale. Xaaladaha qaarkood, waxaa lagu siin karaa waqti kordhin. |

| | |
|---|---|
| 03  | Workfirst waxeey kugu xiriirin karaan saxiibada kala duwan ee bulshada oo aad kaheli kartid khibrad shaqo, waxbarasho, tababar iyo caawimaad shaqo raadis.<br><br>Waxaan leenahay saxiibo badan oo iskaashano iyo agabyo diyaar ah. Xiriirkeena saxiibtinimo ee ugu muhiimsan waa adiga iyo qoyskaaga. |
| 04  | Waan kula kulmi doona si aan uga wada hadalno xaaladaada si laguugu sameeyo qorshe aad kaga qeyb qaadaneeydsid howlaha WorkFirst.<br><br>Qorshahaan ayaa loo samayn doonaa adiga oo keliya iyadoo lagu saleynayo hadafyahaaga iyo baahiyahaaga gaarka ah iyo kuwa reerkaaga.<br><br>Muhiim ayeey kuu tahay adiga inaad nala soo xiriirto haddii aadan awoodin inaad ka qeybgashid ballan laguu qabtay ama howl nashasheed. Qorshahaaga waxaa ka mid noqon doona macluumaad ku saabsan sida aad noola soo xiriiri karto. |
| 05  | Haddii aad joojiso ama aad doorato inaadan ka qeybqaadan howl nashadeedka lagu heshiiyay sabab wanaagsan la'aanteed waxaan kugu soo rogeeynaa xayiraad. Xayiraada waxaa ay yareeynaysaa deeqdaada lacageed 40%, ama waxay sababi kartaa in kiiskaaga TANF la xiro.<br><br>Hadafkeena ma ahan inaan ku saarno xayiraad; Hadafkeena waa inaan idinka caawino adiga iyo qoyskaagaba inaad wajahdaan caqabadaha. |
| 06  | Qof walba dhibaatooyin ayuu la kulmaa nolol maalmeedkiisa. Waxaan fahamsanahay in xaaladahaani ay caqabad ku noqon karaan ushaqeeynta iyo taageerida qoyskaaga.<br><br>Waxaa muhiim ah in la xasuusto in weydiisashada iyo aqbalaadda caawintu ay noqon karto tallaabada ugu horreeysa ee lagula tacaalo xaaladaha adag.<br><br>Waan kula shaqeyn doonnaa oo waxaanan ku siin doonnaa taageero si aad uga shaqeyso horumarkaaga shaqsiyadeed ee kuuqeexan. |

| | |
|---|---|
| 07<br><br> | Inta aad kaqaybqaadaneyso howlaha nashaadeed ee Workfirst, waxaa jiri kara adeegyo taageero oo laga heli karo nawaaxigaaga, oo ay ku jiraan caawimaadda bixinta qarashka xanaannada ilmaha.<br><br>Waxaa lagugu dhiirigelinayaa inaad sida ugu dhaqsaha badan u codsatid xanaannada ilmaha oo ogeysii adeegahaaga haddii aad u baahan tahay adeegyo kale oo taageero ah si aad diyaar ugu tahay inaad si buuxda uga qeybqaadatid howl nashadeedyada WorkFirst.<br><br>Waxaad ka dalban kartaa xanaannada ilmaha khadka tooska ah washingtonconnection.org, ama qaab teleefon ahaan ah 1-844-626-8687.<br><br>Waad mahadsantahay! Tallaabada xigta waxay kuu noqon doontaa adiga inaad nagala hadasho waxyaabaha ku saabsan xulashooyinkaaga si loo sameeyo qorshahaaga wadajir ah. |